

WARQAD WARBIXIN AH OO KU SOCOTA WAALIDIINTA KUNA SAABSAN WAXBARASHADA GALMADA (ISUTAGA) EE DUGSIGA.



Waxbarashada galmada ee dugsiga

Waxbarashada galmada ee dugsiga waa qayb ka mid ah mawduuca "Waxbarashada caafimaadka, galmada iyo aqoonta qoyska". Denmark waa in dugsiyada oo dhama bixiyaan waxbarasho ku saabsan caafimaadka, galmada iyo aqoonta qoyska oo lagu dhigayo dhamaan heerarka fasalada.

Waxbarashada galmadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah ilmahaaga caafimaadkiisa iyo fayyo-qabkiisa iyo horumarkiisa tacliimeed iyo shakhsiyeed. Sidaa darteed ayay caadi ahaan waxbarashada galmadu u tahay qayb ka mid ah shaqada guud ee dugsiga, si loo xoojiyo ardayda oo dhan barashadooda, caafimaadkooda iyo fayyo-qabkooda.

Waxbarashada galmadu waxa ay leedahay hadafkan:

- In laga taageero caruurta iyo dhalinyarada sidii ay u dareemi kari lahaayeen xuduudooda, iyo ixtiraamka xuduudaha dadka kale.
- In la horumariyo caruurta iyo dhalinyarada aqoontooda ku saabsan mawduucyada sida jinsiga, jidhka, dareenada, xuquuqaha, fayyo-qabka, galmada iyo caafimaadka galmada.
- In la horumariyo caruurta iyo dhalinyarada awoodooda si ay u qaataan go'aamo wanaagsan oo taageeraya caafimaadkooda iyo fayyo-qabkooda iyo ka dadka kaleba.
- In loo diyaariyo caruurta iyo dhalinyarada sidii ay qaybo firinfircoon uga qaadan lahaayeen wada jirka iyo bulshada ay qaybta ka yihiin.

Waxbarashada galmadu waxa ay ka kooban tahay

Page 2/2

Waxyaalaha ay ka kooban tahay waxbarashada galmada waxa lagu sar-jaray ardayda da'dooda. Taasi waxa ay ka dhigan tahay, in uu faraq wayni u dhaxeeyo waxyaalaha qaanuuniga ah ee la siinayo fasalada yaryar iyo fasalada waaweyn.

- Fasalada 0-3 waa in, tusaale ahaan la baro mawduucyada sida xuquuqaha, jidhka, xuduudaha, dareenada, nolosha qoyska iyo taranka.
- Fasalada 4-6 waa in, tusaale ahaan la baro mawduucyada sida qaangaadhka(baaluqa), xuquuqaha, xuduudaha, saaxiibtinimada iyo hab dhaqameedka xaga jidhka iyo jinsiga iyo galmada.
- Fasalada 7-9 waa in, tusaale ahaan la baro mawduucyada sida xuduudaha shakhsiyeed, xidhiidhyada(cilaaqaadyada) iyo habdhaqameedka xaga jinsiga, jidhka iyo galmada iyo sidoo kale caafimaadka galmada.

Waxbarashada galmada waxa loo qorshayn karaa sida waxbarasho si gaar ah u socota, laakiin waxa kale oo ay noqon kartaa duruus u socota si wada jir ah tusaala ahaan iyadoo maadada dheenishka, taariikhda, bayoolajiga iyo farshaxanku ay ku saabsan yihiin waxbarashada galmada mawduucyadeeda. Waxbarista macalinka waxa kale oo dheer in kalkaalisada caafimaadka ee dugsigu ay ilmahaaga waxbarayso. Intaa waxa dheer oo kale in dugsigu uu isticmaali karo marti wax dhigaysa(duruus bixinaysa) oo leh aqoon gaar ah oo ku saabsan qaybtaas.

Doorka waalidka

Waxa muhiim ah in idinku ka waalid ahaan aad taageertaan waxbarashada galmada ee dugsiga oo aad u muujisaan xiiso, waxa ilmahiina la barayo. Waxa aad la xidhiidhi kartaan macalinka fasalka si aad wax badan uga ogaataan waxbarashada galmada ee fasalka ilmahiina.

Ka waalid ahaan waxa aad idinku waliba ka ciyaaraysaan door muhiim ah wixii la xidhiidha sidii ilmahiina loogu dhigi lahaa mawduucyada ku saabsan waxbarashada galmada. Caruurta iyo dhalinyaradu waxa ay had iyo jeer qabaan fikrado ku saabsan jinsiga, jidhka, xuduudaha, dareenada iyo galmada. Fikradahaasi oo ay u baahan yihiin in ay kala hadlaan waalidkooda iyo dadka kale ee waaweyn.

Waxbarashada galmada ee dugsigu waa qayb ka mid ah mawduuca , waxbarashada caafimaadka, galmada iyo aqoonta qoyska. Mawduucani waa "saacadlaawe" – taasi waxa ay ka dhigan tahay in aanay jirin tiro ah saacada gaar ah oo loo qorsheeyay mawduucan. Sidaa darteed waa in uu mawduucani ku dhex jiraa maadooyinka xilliyada loo sameeyay ee sanad dugsiiyeedka oo dhan. Waxa jira qorshe qaanuuni ah oo u degsan mawduucan, kaas oo khuseeya dugsiyada oo dhan.